Ministry of Justice and Security

# Waa lagu xiray iyada oo la tixraacaayo amar soo xiritaan ee Yurub waxaana laguu soo kaxeeyay xafiiska (boliiska) ama goob kale oo la'isku dhageeysto. Waa maxay xuquuqda aad leedahay?

## Somalisch

Waddan ka mid ah waddamada Ururka Yurub ayaa adiga kaa soo saaray amar soo xiritaan oo Yurub, maadaama adiga laguugu tuhunsan yahay in aad gashay fal dembiyeed ama maadaama xaakim oo waddankaasi xubinta ah uu adiga xukkun kuugu riday. Waddankaasi waxa uu Nederland ka soo codsaday in adiga laguugu soo wareejiyo sidaa awgeed ayeey kuu soo xireen boliiska, Ilaaliyeyaasha Xadadka ee Boqortooyada ama adeeg kale oo dabagal ee Nederland. Waa muhiim in si fiican aad u fahamto waa maxay xuquuqda aad leedahay. Taasi awgeed warqaddaan warbixinta si fiican u wada aqri.

## Maxaa ku sugaaya?

Waa lagu soo xiray waxaana laguu soo kaxeeyay xafiiska boliiska. Xeerilaaliyaha, ama kaaliyaha xeerilaaliyaha, in ay tahay in aad adiga joogto xafiiska boliiska. Waxaad xafiiska boliiska ku sugnaan kartaa ugu badnaan saddex maalmood. Xaalado gaar ah awgood waxaa uu xeerilaaliyaha go'aamin karaa in saddex maalin kale oo dheeraad ah aad xafiiska boliiska ku sii sugnaato. Waxaan taasi ku magacawnaa 'Xariga ku wareejinta' .

- Saddex maalmood gudahood – iyo ugu badnaan lix maalmood – waxaa lagu hor geynayaa xaakim (-baare ah) ee maxkamadda Amsterdam. Xaakimka (-baaraha ah) waxa uu go'aaminyaa in aad sii xabbisnaan karto. Haddii ay sidaas tahay, waxaa lagu geynayaa xabsiga.
- Lix – ama ugu badnaan sagaashan – maalmood gudahooda waxaa maxkamadda Amsterdam la qorsheynayaa in lagu qabto kalfadhi dadweeynaha u furan. Kalfadhigaasi waxaa lagu qiimeynayaa codsiga soo wareejinta ee waddanka xubinta-EU ah. Waxaad xaq u leedahy in kalfadhigaa oo dadweeynaha u furan aad ka soo xaadirto (qareenkaadana kula socdo) maxkamadda Amsterdam ay ku dhageeysato, balse waxaad xitaa xulan kartaa in aadan kalfadhigaa tegin.
- Ma soo xaadirin miyaa? Markaa qareenkaada ayaa ku masali karo oo magacaada ku hadli kara. Haddi 'Xarigaada ku wareejinta' la hakiyo kolkaa **waa kuugu qasab** in aad maxkamadda ka soo xaadirto.
- Maxkamadda Amsterdam waxa ay ugu dambeyn laba usbuuc kalfadhiga keddib go'aan ka gaareysaa in ay codsiga soo wareejinta ay oggolaaneyso. Haddii soo wareejinta ay oggolaato, waxaa adiga mab'da ahaan laguugu wareejinaya muddo toban maalmood gudahood ah waddanka xubin-EU ah ee amarka soo saaray.

## Hab raaca la soo gaabiyay

Waxaad xitaa dalban kartaa in aad oggolaato codsiga soo wareejinta ee uu soo saaray waddanka xubinta-EU. Kolkaa ma lguugu dhageeysanaayo kalfadhiga dadweeynaha u furan ee maxkamadda Amsterdam. Haddii aad oggolaato wareejintaada, markaa hab raaca waa uu soo gaabanayaa.

Markaa waa in muddo gaaban gudaheeda aad xaakimka ka hor caddeysid in aad wareejintaada aad oggoshahay. Qareenkaada waa uu ka soo xaadiri karaa halkaas. Taasi waxaa lagu magacaabaa 'hab raaca la soo gaabiyay'. Haddi uu xaakimka ku wareejinta oggolaado, waxaa adiga lagu geeynaya muddo toban maalmood gudahood ah waddanka xubin-EU ah ee amarka soo saaray.

Haddii aad ku wareejintaada oggolaatay taasi saameyn ayeey leedahay:

- Haddi aad xaakim hortiisa ka caddeysay in aad oggoshahay ku wareejintaada, markaa tasi marna dib ugama noqon kartid;

Waa muhiim in sii fiican aad qareenkada ugala tashato ka hor inta aadan xulanin in ku wareejintaada aad oggolaato.

## Waa maxay xuquuqda aad leedahay?

- Ma kugu ah waajib in aad su'aalaha ka jawaabto (xuquuqda aamuska);
- Waxaad xaq u leedahay in qareen ku siiyo garabgal xagga sharciga ah;
- Waxaad xaq u leedahy in tarjumaan laguu qabto;
- Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaadka.

**Xuquuqda aamuska**
Inta hab raaca uu socdo marna kuma qasbanid in aad caddeymo bixiso. Kuguma aha waajib in aad ka jawaab bixiso su'aalaha sarkallada dabagalka, (kaaliyaha) xeerilaaliyaha ama xaakimka (- baaraha ah).

**Xaq u lahaashada qareen**
Waxaad xaq u leedahay in qareen ku siiyo garabgal xagga sharciga ah. Boliiska ayaa ka yeelaaya in sida ugu dhaqsida badan keddib xarigaada in aad wada xiriir la yeelato qareen. Haddii aad hore u taqaanay qareen oo aad dooneyso in aad la tashato, taasi waa macquul. Sida ugu dhaqsida badan ugu sheeg boliiska haddii aad qareen gaar ah aad doorbideyso.

Si xog ilaalin leh ayaad mar kasta ula hadli kartaa qareenkaada. Adiga oo uusan oggolaasho kaa heysanin qareenkaada ma kala hadli karo kiiskaada dad kale. Waxaad ugu badnaan la fawqi kartaa qareenkaada muddo nus saac ah, ka hor inta uusan bilaabanin dhageeysiga (kaaliyaha) xeerilaaliyaha.

Qareenka waxa uu xaadir ku ahaan karaa dhageeysigaa. Waxa ay qaadan kartaa wakhti inta uusan qareenka xafiiska boliiska soo gaarin. Waa in uu laba saacadood gudahooda ku yimaadaa xafiiska boliiska, balse taasi mar kasta ma hir gasho. Dhageeysi waxa un uu bilaaban kara marka uu qareenka soo xaadiro keddib, ilaa ma in aad adiga ku adkeeysato in aadan dooneyn in aad adeegsato xaqqa aad u leedahy qareen in uu kaa garab galo xagga dhageeysiga. Keddib dhageeysiga waxaa uu (kaaliyaha) xeerilaaliyaha go'aan ka gaarayaa in ay thay in wakhti dheeraad ah aad xafiiska boliiska ku sii sugnaato.

Haddi ay boliiska ay qareen kuu yeeraan, adiga ma bixineysid kharashka qareenkaasi. Balse haddii aad qareen adiga xulato, xaaldaha qaarkood kharashka adiga ayaa bixinaaya. Astaamahaada shaqsiga ah waxaa loo gudbinaayaa Guddiga Garabgalka Sharciga waxaan lagaga hawl galayaa hab maamulkooda.

Waxaad xitaa xeerilaaliyaha ka codsan kartaa in garbgal qareen laguugu siiyo waddanka xubinta-EU oo amarka xiritaan soo saaray. Qareenkaasi waxa uu ku war gelin karaa qareenkaada Nederland hab raaca ka jira wadaankaasi xubinta-EU ee soo saaray amarka xiritaan.

Maamulka waddanka xubinta-EU oo soo saaray amarka xiritaanka ee Yurub waxay warbixin kaa siin karaan sida ay macquul ku noqon karto in halkaasi lagaaga qabto qareen. Taasi waa in aad iskaa u sameysataa, balse waxaa kaa caawini karo qareenkaada Nederland.

**Muxuu qabtaa qareenka?**
Qareenka adiga danahaada ayuu u taagan yahay waana ku garab galayaa muddada uu hab raaca wareejinta socdo oo dhan: marka boliiska ku dhageeysanaayo, marka lagu hor geeynaayo xaakimka (-baaraha ah), iyo kalfadhiga u furan dadweeynaha ee maxkamadda Amsterdam.

Qareenka:
- waxa uu kuu sharxayaa hab raacaan sida uu u dhaco;
- waxa uu kuu sharxayaa xaqqaada iyo waajibaadkaada;
- wuxuu ku siinaya talo shaciyadda la xiriira;
- reekaada, saaxibadaada ama shaqo bixiyahaada ayuu xaaladdaada ku war gelinayaa (haddii aad adiga taas rabto);
- waxa uu xirii la sameynayaa qareenkaada ee waddanka soo codsaday soo wareejinta;
- isaga oo magacaada ku hadlaayaa ayuu maxkamadda ka hadli karaa.

**Xaq u lahaashada tarjubaan**
Waxaad xaq u leedahay garabgal tarjubaan haddii aadan afka nederlandiiska (si fiican) ugu hadlin una fahmin. Xitaa marka aad afka nederlandiiska xogaa aad ku hadasho iyo/ama ka fahamto waxaad xaq u leedahay garabgalka tarjubaan. U sheeg boliiska in aad iyaga si wacan u fahmeynin ama ula soconin, markaa waxaa laguugu wacayaa tarjubaan. Tarjubaanka waxaa uu kaa garabgalayaa xitaa wada hadalka aad la leedahay qareenka. Tarjubaanka ma ka hadli karo kiiskaada isaga oo aan oggolaasho kaa helin. Kharashka tarjubaanka adiga ma bixineysid.

**Xaq u lahaashada daryeel caafimaadka**
Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaadka. U sheeg boliiska haddii aad xanuun dareemeyso, aad dooneyso in aad dhakhtar la hadasho ama aad daryeel caafimaad u baahan tahay. U sheeg boliiska xitaa haddii aad daawooyin isticmaasho ( oo aad u baahan tahay).

**Xuuqyada kale**
Waxaad xaq u leedahy koobi oo amrka xiritaan ee Yurub. Haddii uu amarkaasi ku soo baxay af aad fahmeynin, in qeybaha ugu muhiimsan lagaga tarjumo ayaad xaq u leedahy.

Haddii aadan dhalashada nederlandiiska aadan lahayn, waxaad markaa sarkaalka dabagalka ka codsan kartaa in qunsuliyadda ama safaaradda ee waddanka aad ka soo jeeddo lagu war geliyo in lagu xabbisay.

## Su’aalo?

Weli ma qabtaa su’aalo? Weydii kuwaasi qareenkaada Nederland ama sarkaalka dabagalka.

**Gunaanad**
Warqaddan warbixinta waxaa soo saaray maamulka-guud Boliiska iyo Nabadgelyada Gobollada ee wasaaradda Cadaaladda iyo Nabadgelyada

Postbus 20301 | 2500 EH  Den Haag

Oktoober 2024 | 24407239

*Nuxurka warqaddaan warbixinta wax xuquuq kama dhaxleysid.*